

Minister of Internal Affairs Regulations on Voter Registration (2008)

XEER-NIDAAMIYE WASIIR: DIIWAANGELINTA CODBIXIYAASHA (2008)

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Guduhu

Markuu arkay: Qodobka 109aad, 111aad iyo 112aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu arkay: Xeer maamulka gobollada iyo degmooyinka Lr. 23 qodobkiisa 103aad.

Markuu arkay: Xeerka doorashooyinka Lr. 23/200, qodobadiisa 8aad, 9aad iyo qodobkiisa 40aad.

Markuu arkay: Xeerka jinsiyadda Qaranka Xeer Lr. 22/2001 qodobadiisa 3aad, 4aad, 5aad iyo 8aad ee tilmaamaya sugidda nabadgelyada.

Markuu la Tashaday: Komishanka Doorashooyinka Qaranka iyo Diiwaangelinta Qaranka.

Wuxuu soo saaray Xeer Nidaamiye

Qodobka 1aad

Waxa la Diiwaangelinayaa qofkasta oo uu dhashay Jamhuuriyadda Somaliland

Qodobka 2aad

Waxa mamnuuc ah in qofku laba jeer ama laba goobood iska diiwaangeliyo qofkii isku dayana wuxuu mutaysan doonaa ciqaab gaadheysa xadhig dheer iyo ganaax.

Qodobka 3aad

Qofka ajaanibka ah ee aan waafaqsanayn sida uu tilmaamayo xeerka jinsiyadda qodobkiisa 4aad, 5aad, 7aad iyo 8aad iyo qodobka dastuurka ee 23aad oo isku daya inuu kaadhka muwaadinimada iyo ka codbixinta qaato, wuxuu muteysan doonaa ciqaab xadhig dheer iyo ganaax.

Qodobka 4aad

Muwaadinka macluumaadka laga buuxiyo ka been-abuura waxa lagu ciqaabaa xadhig iyo ganaax iyo xuquuqdiisa doorasho oo uu waayo.

Qodobka 5aad

Muwaadin kasta oo damiinta qof aan muwaadin ahayn ama markaati been ah u fura wuxuu la kulmi doonaa xadhiga dheer iyo ganaax.

Qodobka 6aad

Qof kasta oo ku kaca fal dambiyeedyadan ku xusan qodobadda xeer nidaamiyahani qeexayo waxa la hor geyn doonaa maxkamadda awoodda u leh.

Qodobka 7aad

Fulinta xeer nidaamiyahan waxa uu xil saaran dhammaan guddoomiyeyaasha gobollada, taliyeyaasha qaybta booliska Guddoomiyeyaasha Golaha Deegaannada iyo masuuliyiinta heer qaran iyo heer degmo.

Qodobka 8aad

Masuulka u sahla qof aan Somalilander ahayn waraaqaha caddaynta iyo muwaadinimada ama midkood waxa uu mutaysanayaa xadhig dheer iyo ganaax.

Qodobka 9aad

Xeer nidaamiyahan wuxuu dhaqangalayaa marka uu saxeexo Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Cabdillaahi Ismaaciil Cali (Cirro)
Wasiirka Arrimaha Gudaha
15/10/2008